



GUUDMARKA LUUQADDA FUDUD KU QORAN EE SIYAASADDA KAALMADA DHAQAALE EE UNITYPOINT HEALTH

UnityPoint Health (“UPH”) waxay siisaa kaalmo dhaqaale dad badan oo qaba baahida daryeelka caafimaad oo aan awoodin inay iska bixiyaan lacagta daryeelka. UnityPoint Health ma rabto awoodda qofku u leeyahay inuu iska bixiyo biilka inay ka joojiso helista daryeel. Tani waa guudmar Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee UnityPoint Health (FAP).

Jiritaanka Kaalmada Dhaqaale

Waxa dhici karta inaad awoodo inaad hesho kaalmo dhaqaale haddii aanad awoodin inaad iska bixiso biilka daryeelka caafimaadkaaga. UnityPoint Health waxay siisa kaalmada dhaqaale adeegyada caafimaad ee loo baahan yahay. Adeegyada ikhtiyaarka ah, sida qurixinta, heli maayaan kaalmada dhaqaale.

Shuruudaha Mutaysiga

Dakhliga guud ee dadka ku nool guriga ayaa loo isticmaalaa in lagu go’aamiyo haddii aad heli doonto kaalmo. Haddii dakhligan ka hooseeyo 200% ee Heerka Saboolnimada Fadaraalka (FPL), ma aha inaad bixiso biilkaaga cusbitaalka. Dakhliyada u dhexeeya 200 iyo 600% ee tilmaamaha FPL bixin maayaan kabadan xaddiyada sida qaajibka ah lagu soo dallacay dadka leh caymiska, ayna dhici karto inay mutaysteen qiime-dhimis dheeraad ah. Haddii aad leedahay hanti badan, waxa dhici karta inaad helin kaalmada dhaqaale. Fadlan tixraac siyaasadda kaalmada dhaqaale ee UnityPoint Health ee dhammaystiran si aad u hesho sharraxaad iyo tafaasiil dhammaystiran.

Halka laga Helo Macluumaad

Waxa jira siyaalo badan oo loo helo macluumaad kusaabsan habka dalabka FAP, ama loo helo nuqullada FAP ama foomka dalabka FAP. Si aad u dalbato kaalmada dhaqaale waxa aad:

- Ka soo dejisan kartaa macluumaadka onlaynka ah barta www.unitypoint.org/FAP
- Ku codsan kartaa macluumaadka qoraal adiga oo boosta ugu diraya: FINA Team, 6200 Thornton, Suite #100, Des Moines, IA 50321 ama booqanaya xafiiska lacag-hayaha ee Cusbitaalka UPH.
- Ku codsanaya macluumaad adiga oo wacaya Xafiiska Dhexe ee Biilasha ee UnityPoint Health (888) 343-4165

Jiritaanka Tarjumaado

Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale, foomka dalabka, iyo guudmarka luuqadda fudud ku qoran waxa lagu bixin karaa luuqadaha soo socda: Ingiriisi, Isbaanish, Shiine, Afrikaan, Carabi, Faransiis, jarmal, Hmong, Kuuriyaan, Laotian, Serbo-Croatian, iyo Fiitnaamiis. Sidoo kale waxa lagu bixin karaa far waawayn. UnityPoint Health waxay dooran kartaa inay isticmaasho kaaliyayaal tarjumaad, tilmaamayaal tarjumaad, ama isticmaali kartaa tarjumaano aqoontooda la caddeeyey marka la codsado. Macluumaad kusaabsan tarjumaadda foomamka Kaalmada Dhaqaale ee UPH, fadlan tag xafiiska lacag-hayaha Cusbitaalka ama ka wac wakiil (515) 241-7000.

Sida loo Dalbado

Waxa aad u baahan doontaa inaad buuxiso foomka kaalmada dhaqaale. Foomka dhammaystiran iyo dokumentiyada la codsaday waxay u baahan doonaan in loo diro UnityPoint Health si loo eego. Haddii aad caawimo u baahan tahay foomka, waxa aad la xidhiidhi kartaa Xafiiska Dhexe ee Biilasha UPH (888) 343-4165. Marka ay dhammaato, dalabka iyo dokumentiyada la codsaday waa in lagu diraa boosta iyada oo lagu hagaajinayo: FINA Team, 6200 Thornton, Suite #100, Des Moines, IA 50321.